



HOGHOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGHOL Soomaali Maay Newsletter
| **Bil'ly - Monthly** |

Walaa Tiroduung ki jero

- Taariikdy Jamaa'atha Baardheere (1-2)
- Aawow Barkadly Yusuf ii Elif Ly Kordhoweey (2-3)
- Abtugaalky Kutaabtii Afky Aayoow (3-5)
- Qeeb ku mid eh Doodhisky Afky Maayky (5-6)
- Wargiling (7)
- Fiiri Gaar (7)
- Manaahijta walbarashoohy Dowladda Federaalky (7)

Tifaftiry: Abdullahi Sheikh Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaaligy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Af Maay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.

Taariikdy Jamaa'athy Baardheere: Qeebtii 11aad Baardheere Historia=Baardheere History



Dr Omar A. Sh. Abdurahman Sweden

Qeebti 9aad & 10aad weybaa hangky hadalneey taariikdii Aw Sheq mad Edein Kerow. Reed ing dhisky jameeda Baardheere. Wey kaloo haka hadalneey arrintii sahamiyeyaalkii reer Jarmal oo hogamiyaayi Karl Von Der Decken. Dilki Decken i widaaysheey wey abuurteey obsi talyaanigy ing Baardhere kooyang.

Qoraalkung weybaa hake qaadidaanee qoys eed liingke kasaaw Baardheere, arlaady i Somalia guud haang. Aw Maye Mahamed oo ling kasaayi (Aw Maye Mad gaab) wey ky mid haayeey dadkii Aw Sheeq Mad eding keerow ly kooyi Baardhere marki beledky reed liing aasaasaayi, burburkii ku reed.

Aw Maye wey ky mid haayey dadky Decken ly jiri marki la ha qobidi, ruunsheey liingky jeeyi amaan haang.

Weybaa dhiideey ing usugo moqong ly dili qofki lyky amaanoyisidi. Markaas Aw Maye dhirifi, wey ing beheey buuly le eraayi (Guuduudke aw Maye) oo hadde ling kasaaw Jawaarey, sannadki 1865.



Isly marki Sabeengaa ly ki hiri markaas Baardheere haky nagadi. Laaking isly sinidkaas iya hatiny wey ing guureey Heethoole oo haddy ling kasaaw (Af-Madoow). Meelas iya degi, ky arriigni dhaly. Weybaany ky aasaaseey Jameea. Ariinyoosheey weybaa ku mid haaytey geber eed ing af madoow, saas daraadiye iya meelaas lingky biyi magaagy Af-Madoow. Marky asal haang Af-madow weybuwaa degaang dad Jameeada Baardheere eh aasaaseng.



Masawirkuung weywa igaarshe oo le erow Mohamed Aw Maye. Wey haayey galan-yaraagy (secretary) Aw Sheikh Abdiyow Osmanow. Ariignoshey wey ky mid haayey Osman oo dhaly Halyeygi asaasiyaashi SYL Mohamed Osman Mohamed Aw Maye (Baarbe) oo asalshoo Tunni eyi.

Maalm ing dheerayny weybaa la arageey dad mundulood eh (beesha Cabdi Mohamed) oo sheegidaasy ing Baarbe Mudulood haayi. Malmogung dambe weybaa arrigaane dad taariihdy Baardheere si qaldang ungyk sheekeeyaaw.

Taas weybaa qeeb ke etaa bililiqade i boobke taarikhde, lang doorkii i dhanqky reer arlaadi iyoonaay mogdy giliyoowky taariikdy Jameeada Baardheere. Maleeshiye beeled maamul inis ekaaysiyi iya arlaadi i dadshe boobayaang. Ay tiringeng magaageng isly tiirinooy. Ly dareer qeebti 12aad



Aawow Barkadly Yusuf ii Elif Ly Kordhoweey

Bare sare Mohamed Haji Mukhtar
Savannah State University
Savannah, Georgia, USA

Maqaalkikeey kang ku horeeyi, way akriisitiyaalky hang tilmaamey ini ulmaadi Reer Arlaadi dijhiyeeng manaahij badyng oo Maayeeyi baryshydy Qur'aangky kariimky eh ii uluunty ly hariirty diinty islaangky. Maqaalkung way misaal hang qaadideey ulmaadaas koosho oo mashuur ky eh barashydy Quraanky.

Maallyngky, kabiirky, wiligi (*saint*), ingky horreeyi Maayeeyi heggaaady amy edetee fuuly Abjadky Arabigy, oo deddejiyi (*revolutionized*), barashydy uluunty diinty, way eya: Aawow Barkadly Yusuf (Qs. Qarnigii 13aad). Somalidy bersho way ing kasaayany Aw Barkhadle, haanony way ing gorydaany Yusuf al-Kawneeyn. Way haayey maallyng ii wili karaamy badyng, door wiingny ku qaadydi fidiyoowky diinty Islaanky, Somaliya. Riwaayidoo dheheneeghy eh (*oral sources*), ky saabsyng taariik nolaleedshey way ky farjhiisyniina meelby Somali ku degginty, Gaasky Afrika, goony haang Arlaady Koofur-orsy, Waqow-orsy Somaliya, ii Itoobiya. Way kele lyky xuseeyi jasaan irka Moldives, ee Maagnywiinty India. Riwaayidoohung kullysho way isky raasinyiinaa,

Aawow Barkadly Yusuf inii haayi maalling Quraangky Maayeeyi Elif-Baada-Taada Arabigy, amy Abjadka Af Arabigy (*al-Xuruuf al-Hijaa'iyya al-Carabiyya*), oo luyng kasaw: Elif ly Kordhoweey Elif ly Hoosdhowey Elif Ly Godi. Faa'idyydy ky jerty arryntuung way Reer Arlaadi ing dhib yeraayteey amy ing fududaayteey baryshoody Qur'aangka Kariimky, ii uluunty ky saabsyng diinty islaangky. Rung haang, eedaa wal tar ing weeldhiti, door wiingny ungyku qaaditi baryshoody iyo faafiyoowky diinta Islaangky. Riwaayidoo bersho way tilmaamayaany ing Aawow Brkadly Yusuf ku dhaladi

bahdy (*family*), Umur Walasmac oo haayi asaasygii Mamlakydi Islaamigy ee Ifat, Koofurty Shoa, Itoobiya.

Gobolleedy Koofureed, Somaliya, goony haang Gobolky Bokool, Aawow Barkadly Yuusuf way lahayki toweeyi dhaktamoow (*competition*), dhahmari Aawow Barkadly Yuusuf ii sixirooly ly errayi Barambara oo haayi boqor diinglaawy haayi (*Pagan*), amarsheey liing diidy korny, waany haku horjeedi faafiyoowky diinty Islaangky. Geekooby, Barambara way sharyd ly dhikideey Aawow Barkadly Yuusuf, lamaadiyoo lanki rooyi ye diintis ly rahe. Barambara, meel binnaang eh buur wiingny ky taally ye iniisky weeri dadsheey. Way errey: “lamaadaany langkii diintiis rung ety waybuwaahi langkii buurtung haluulydi oo heggaas ungu bahy”.

Aawow Barkadly Yuusuf oggolaadi usy oo isky hallaayaw rabbishey. Barambara yee billaawi, haluulydi buurti, dhinyghy kele fut ungu erri. Bulshoodi fiirsydaasi way eed ingly yaabena, kily hindhi fukaawena Barambara falshey, waana rumaayeng. Aawow Barkadly Yuusuf naftiis eedaa ing nahi, laaking, way ku dalbydey ing Barambara mar lammaad ky naghy falkiishey. Marki Barambara oggolaadi Aawow Barkadly Yuusuf Yaasiinka ing qobydi. Ilaahey amarshey sixiroole Barambara buurti mahaku banny mar dembyny mal aragny. Bulshoodii Barambara meella ky islaameng.

Aawow Barkadly Yuusuf way kele lahayki toweeyi bung jeelang. Kur buntiis ii kaalliye, way yaa-laana Herengky, Oboow Umur, ky yaaly Sarmaang Wiing, Bokool, Somaliya ilaa geeky. Ani hindhoogey haky araghy Jiilaalki 1994ki, unny oo safar ilmy baaris ii qaraaby salaang ky deerni Arly Sarmaang; way isly jerney dad ku mid haayeeng Malaak Abiikur Ibdow Eedyng ii taariikyahang Moxamed Xusein Mucallim Cali.

Hanraabty koofurta Somaliya iyo Heebo Banaadir, maddi uursho deery billy sagaalaad, oo ly leyi owmee dhalaase sheher miing dhimming, way hanraabty widaayooshee eh ing suubiyaayana xafly amy hus liing kasaw Kurti Aw Barkadly, sidy (*babysheer*), oo kele. Bung ii sharuur ye isky aamaayang, tooraa fuugsydaayang, ariirty uurky lenny madishe ye lyky shibee dhaasyghy bunky.

Aawow Barkadly Yusuf way kelee liky huseeyi Arly Waaqow, Somaliya. Meel ungu dheerayny Hargeysa way ky yaale Heryng ky dhah yaalang lamy qabry koosho ky duugygni Sayidnaa Ali ibn Abii Taalib, (sidy Reer Waaqow aaminsygniing), kang keleeney eyi Aw Barkhadle, sidy Reer Waaqow ingky weriyaayaang.

Abtugaalky Kutaabtii Afky Aayoow (Qurby roog/Diaspora):

Barathowky Af Soomaalighy Maayky

May bahdy Dooqaadky Hoghol sharaf i qaddeering ing ehaa inii de' yar Soomaaliyeed qurbo roog eh (diaspora) eed ing jeel inii Afky Aayoow baradaang oo dedaal eed ing billeering wedaang haniily hariireeng. May lenaa walaalyaal ha dhowaada Dooqaadky Hoghol may liing aasaaseey inii Afky Aayoow liky hormariyo isiingny qiib ku nagada in shaa Allahu wada shaqeeyaane. De' yarty haniily hariirty magiyaalshoo iyoonaay meeloogii yoo shal rooghaang iyo inii yoo eed ingky hamuung qabaang barashoody Afky Aayoow iyee haniily wethaageeng sitha abtugaalliyoo hoos ku muuqito.

Is barashy

Hasang

Siing salaamy Hoghol Newsletter i akrisidiyaalky dhamaang

Any Maghaagheey maybuwaha **Hasan Dayle**. Maybaa ky noolaa wadanky Ingriisky. Mayba ahaa lanky ha aasaasy ruunky wal barashathy Afky Maayky dhinigy Clubhouse.

Tirithy Kutaabty Afky ayoow clubhouse maybuwa shang boghol i tumii siyeed (518).


Qofkii haky biro fadaaw hilighy asharky la ha bandhikaaw maybuwaaha afar sa' hamiinimy sa'ady wadanky Ingriisky ama 10 pm GTM oo gee sabty ilaa jimaa. Haddii ilaaheey erry soongky fasahaa enny.

Runtii may dareemeey Afky aayow barashoothiis inii hanuug baahy langky qaby.

Sanduugee (boxes) hoos meey ku muuqidaany Libaanshow iyoonaay kutaabty Afky Aayoow kuna mid eh CLUBHOUSE. Qofkii daneeyaaw clubhouse haky darsamo kore.

Haddii ilaahey ery meey rajeyee inty clubhouse haku gudbiyedoony asharyaal badang madaama mustaqbalky hadhoow uny rajeyyaany isbedel. Qofkii ha ila hariiry fathaaw mey oo heleey emailky oo eyi hasan@maayland.org i websitekaany oo eyi maayland.org.

Mahadsingtiing,



Aashy

“Any Asha “Rajonoir” Noor iyee lii erree. Any may ky noolaa Washington DC, Mareeykanky. Aawkeey i aathey Sanaagaa ku kooyeeng, laakin any Mareekaankaa ki kori. Eed i eedaa ingy farahsana barashoothy Afky maayky, i qolky afky aayoow.

Any maybaa eed ing jeela dhaghanky i Afafky Soomaalighy. Afky i dhaghanky Maayky may leyiinaa taariik eed ing qiima badang. Shang bilood Ku hor iyee any billaawi barathoowky Afky Aayow ky (ky hathalooow/dowahoow, abtughooow, i akriyoow). Haty ky dambe, Any ky hadalee lamatha Af Soomaali-Maayky i Mahaatirighy. Maallingky fayly - Aw Hasang, ii dhammaang Maallyng ii kutaaby oo qiimy bathang leh yee mahad billeering usku leh Ilaaheey ku sokoow. Any maybaa fatheey inii ing baho Baydhowy, i arlaathy dhammang ing seethy.

-Asha “Rajonoir” Noor

Kiineey

“Any Magaagy may le erreey **Kiineey**, walaa jiree sodong sini. Any maybaa ky dhaladeey Mugdisho, way ky koreey kenya. Wali ly deqenaa reerkaayna. Wey baradeey kalkaalisy illaa fasalka/classka 6. Wey deqenaa wadanka Amerika. Walii any jeelaa Afka maayky inii any barathy, markas arlaady in baha, bilaanty/hangraabty i iyaalka inii any kaalmeeya, Meey la haa Maayland guul in shaa Allah. Mahadsyntiing.”

- **Kiineey**

Haliimy

“Ky salaami withayoow. Maghaagheey maybaa ly ererey **Halimy**. Maybaa rooghe London laking arlaady iyee ku kooyi. Maybaa ky dowaha koree lamy af- English i Soomaali Maxaa. Maybaa jeelaa inti any barathy afky maayky. Maybaa barathahaayee wakty ku bathang shang bilood. Amyng dhow yee ing jeethy safar mayba fathey ingti baabuur buuby kory, Mogdishy seedo billy tumunaad. Ku reedny illy Baydhowy sababtiny maybuwaha neped eetha ing daneeyey meelaas. Mayba ky farahsyna ingti any siing kooyy clubhouse i isbarathowkeeny. Maallyngky Hassan aad fayly aad iny Mahadsyny. Kulung demby oo hiisy leh In shaa Allah”

- **Halima**

Liibaang

“Maghaaghey weyba le ereey **Liibaang Abdilaahi Huseng**, weybaa ha ky korey Magaalythy London. Walibaa eed i eed ing salaameey dadky guruupky afky aayow ky jerang, waliibaa eed ingky farahsanaa haky biiroowky guruupkung, waliibany rajeeyeeey inshaa Alaahu inii uny shal faa'itheeysiny lahjaddy Afky Aayow (Af maay). Waliiba ky farahsanaa inii dad bathang oo Diaspora eh oo afky aayow ky barithy donaa haddii Ilaaheey erra. Mahadsign-ting”

Liibaang Abdilaahi Huseng



Barbaareey eedaa ing mahadsantiing. Salaangty qiimigy badang siingku qaadni ha dhowaada mar lammaad i mar seddehaadby.

Qeeb ku mid eh Doodisky Afky Maayky - Part of Maay Gramatic

Abdulkdir Abukar Sheikh –Dalib, Örebro, Sweden

**Fal roogy o weer (jumly) ki dhahjira-Verb presens med meningar
Verb in Present tense**

Fal rooghy	Fal jooga	Presens – Verb	Present tense
Any araghee iriidy gee kasty.	Anigu waan arkaa. qoraxada maalin kasta.	Jag ser solen varje dag.	I see the sun every day.

Athy akriyaasy asharky madoo madoo.	Adigu waad akhridaa cashaka mar mar.	Du läsar lektionen ibland.	You read the lesson sometimes.
Usy dheele ba-loony Ehed kasty.	Isagu wuxuu dheelaa kubbad Axad kasta.	Han spelar fotboll varje söndag.	He plays foot boll every Sunday.
Iyee doowahaasy maaling kasty.	Iyadu wey hadashaa maalin walba.	Hon pratar varje dag	She talks every day
Uny fiiriyaany irky hiraab kasta	Annagu waan eegnaa circa subah walba.	Vi tittar varje molnen morgonen.	We look every morning the sky.
Ising dareeraasang hamiing kasty.	Idinku waad socotaan habeen kasta.	Ni promenerar/går vaje kväll.	You walk every evening.
Iyoo hunduraayang hamiing kasty.	Iyagau wey hurdaan habeen kasty.	De sover varje nat.	They sleep every night.

Fal taby o weer (jumly) ki dhehjira - Verb preteritum med meningar –Past tense med sentences


Fi'il tapy	Fal tagay	Preteritum	Past tense
Any wey ku fikirey imtihaaanky.	Aniga waxaan ka fakaray imtixaanka	Jag tänkte eom provet.	I though the test.
Athy wey aangteey hunguri shaley.	Adiga waxaad cuntay cunto shalay.	Du åt mat igår	You ate food yesterday.
Ali wey ing baheey dugsighy.	Ali wuxuu aadey/u baxay dugsiga	Ali gick till skolan	Ali went to school.
Faaduma wey ab-tugteey buug.	Fadum waxay qortay bug	Faduma skrev en bok	Faaduma wrote a book.
Uny dheelni ba-looniga lugty shaly.	Annagu waan ciyaarnay kubadda cagta shaly	Vi spelade fotboll igår	We played football yesterday.

Leely/Överning/Exercise - Fal roogy (present tense)

Meeluung ki buuy falky ku moqon oo waqti roogy eh./Fill the mising verb (present from)

Weerty/qoraalky/mening/sentence	Fal/Fal/verb
Any wey ----- shaahi maaling kasty	(kariyoow/Karis/laga mat/cook)
Iye wey ----- hamiing kasty	(shaqy/shaqo/arbata/work)
Athy wey ----- galab kasty	(dareer/soco/gå/walk)
Usy wey ----- aany hiraab kasty	(dhamoow/cab(dricka/drink/
Uny wey ----- raadiye gee kasty	(dhegensidoow/dhageyso/lysna/listen
Ising wey ----- iriida madoo madoo	(timlaang/tilmaan/pekar ut/ pointing out
Iyoo wey ----- baabuur madoo adoo.	(wedoow/kaxee/kör/drive

Jawaabty haky dir: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com



Wargiling:

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hurmariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, haniingky dir:

Email. afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Goobty Horumariyowky Afky- Maayky - Afmaay Development Center (ADC)

c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige

Föreningarnas Hus Slottsgatan 13A, 70361Örebro, Sverige

Tel. 019-133110

E-mail: sydvast.somaliska@outlook.com

FG/NOTE: Wili mi jero far jaang gohong (standard script) oo dadky dhong isky si' ing istimaalaayaang. Intii taas luku deeraaw may ki dethaalaanee inii sidy ingky fudud dadky wal ky kasiyo korno omboo farmiinty (the message) ky gudbiyo korno unughoo eed iniing beddelne maqaalee dadky ha niing qoraayaang. Sidaar dartiye akriisidiyaalky may ku edsedaane inii saas niily ogaadaang. Eedaa ing mahadsantiing.

Manhaj Jangjeero

Manaahijta Walbarashootha Dowladda Federaalky mi dheel-litiring.

1- Buugaagty Mahaa tirileey ky qoronyiing

2- Gopolee koofureed afshoo, taariigdiyoo iyo Dhaghanshoo ku moqonyiing buugty taariikdy iyoonaay haang af Soomaalighy addaala dorruwaa hal sahooy

AMDC